

Su'aalaha badanaa la isweydiiyo

Ku saabsan: Amarka Fulinta Xaalada Degdega ah 20-14

Markii ay ahayd Maarso 23, 2020, ayaa Gudoomiye Walz wuxuu saxeexay Amarka Fulinta Xaalada Degdega ah ee 20-14 kaas oo joojinaya ka saaritaanka guryaha iyo xukunka soo ceshashada xiliga muddada xaalada degdega ah ee COVID-19. Amarkan Fulintu wuxuu dadka ku ilaalinayaa in ay hoy xasiloon haystaan oo wuxuuna ka hortagayaa barakicinta inta lagu jiro xaaladan caafimaad ee degdega ah.

Mar haddii la fuliyo, Amarka waxaa laga heli doonaa [Maktabada Tixraaca Sharciga Minnesota](#).

Cusboonaysiinta La Xiriirta Amarka Fulinta ee 20-79 (Luulyo 14, 2020): Markay ahay Luulyo 14, 2020, Gudoomiye Walz wuxuu saxeexay Amarka Fulinta 20-79, kaas oo wax ka beddeli doona xukunka ka saaritaanka guryaha ee hadda jirta. Laga bilaabo Ogosto 4, 2020 saacadu markay tahay 12:00am, qodobada dheeraadka ah ee soosocda ayaa dhaqan galaya:

- Marka lagu daro sababaha ka saaritaanka guryaha ee uu ogolyahay EO 20-14 iyo 20-73, ka saaritaanka waxaa loo ogolaan doonaa in maxkamada laga xareeyo xaaladaha markii:
 - Kiraystuhu uu qalab ahaan u jebiyo hesiiska isaga oo si weyn u dhaawacaya hantida dhismaha; ama
 - Milkiilaha guriga ama qaraabada milkiilaha marka ay u soo guurayaan guriga 7 maalmood gudahood markii uu kiraystuhu baneeyo.
- Amarka soo ceshashada ayaa la fulin karaa haddii mulkiilaha loo xukumay qaadashada hantida ka hor intii uusan EO 20-14 dhaqangelin Maarso 24, 2020 saacadu markay ahayd 5:00 pm.
- Mulkiileyaasha waxaa looga baahan yahay inay siiyaan kiraystayaasha ogeysiis qoraal ah 7-maalmood ka hor inta aysan buuxin fulinta ka saarida. Tan waxaa loogu tala galay in kiraystayaasha la siiyo ogeysiis iyo in loo fududeeyo xallinta iyada oo aan kiis maxkamadeed la xaraynin.

- **Qeexitaannada:**
 - **Amarka maxkamada ee soo ceshashadu** waa amar maxkamadeed ka dib markii milkiiluhu ku guuleystay kiis guri ka saaritaan. Amarka maxkamada ee soo ceshashad waxaa keena xafiiska sheriff-ka wuxuuna siiyaa kiraystayaasha 24 saac inay ka baxaan guriga.
 - **Amarka joojintu (moratorium) waa** ka joojin sharci ee howl.
 - **Muddada lasoo noqoshadu waa** wakhti cayiman inta lagu guda jiro howsha la noqoshada bangiga markaas oo milkiilaha gurigu uu ku bixin karo deynta lagu leeyahay iyo “dib u soo furan karo” hantida.
- **Guud ahaan**
 - **Amarku muxuu qabtaa?**
 - Amarku wuxuu ku haynayaa kireystayaasha guryahooda kirada ah iyo guryaha bangigu kala wareegayo inta lagu jiro xaalada degdega ah, marka laga reebo duruufo xaddidan.
 - **Goorma ayuu amarku dhaqangelayaa?**

- Amarku wuxuu dhaqan galayaa 24 saacadood kadib marka la ansixiyo. Wuxuu soconayaa ilaa xaalada deg dega ah ee lagu dhawaaqay ee xilliga nabadu uu dhamaanayo.
- **Kiraystaha wali ma lagu leeyahay kirada inta lagu jiro amarka joojinta?**
 - Haa. Amarkan kuma jiraan wax ka dhaafaya kiraystuhu inuu bixiyo kirada.
 - Waxaan si adag ugu dhiirigelineynaa kireystayaasha inay:
 - Horay in aad ula xiriirto milkiilahaaga wixii ku saabsan kharashka kugu go'an.
 - Bixi wixii aad awoodo sababta oo ah waxay caawin doontaa milkiilaha waxayna kaa caawin doontaa hubinta in aadan aad dib ugu sii dhicin kirada lagugu leeyahay.
- **Milkiilaha guriga miyaa laga rabaa inuu wali bixiyo lacagta amaahda guryaha?**
 - Haa. Hakintan kuma jiraan wax ka dhaafaya amaahdaha inuu bixiyo lacagta. Amarkan wuxuu ka codsanayaa hay'adaha maaliyadaha in ay soo rogaan amarka joojinta guri la wareegitaanka iyo inaysan ku soo rogin khidmada la daahitaanta. Haddii ay taas doortaan, hay'adaha maaliyadu wali way bilaabi karaan hawlaha la-wareegista guriga, laakiin, inta lagu jiro muddada xaalada caafimaad ee degdega ah, kama saari karaan shakhsiyadka guriga ku sii jira dhammaadka muddada la wareegitaanka.
- **Qoysku miyuu u baahan yahay inuu muujiyo in dakhligu uu ka lumay ama laga helay COVID-19?**
 - Maya. Amarkani uma baahna in COVID-19 la idinka helay ama muujinta dakhligu uu idinka lumay. Ujeeddada amarkan ayaa ah in qoysaska loo ogolaado inay ku sii jiraan in ay si xasiloon hoy u haystaan maadaama ay dhowrayaan caafimaadka naftooda, qoysaskooda, iyo dadka kale ee reer Minnesota.
- **Dhammaan noocyada ka saarista ama jebinta heshiisyada kiradu miyey ka reeban yihiin in maxkamad laga xareeyo inta lagu jiro joojintan?**
 - Maya. Guri ka saaritaanka ama jebinta heshiiska ayaa laga yaabaa in la fuliyo kiisaska markii uu kiraystuhu si dhab ah u khatar gelinayo nabadgelyada dadka kale ee degan ama ku xadgudubka 504B.171 subd. 1. (hawlo sharci darro ah qaarkood in lagu sameeyo guriga). Mulkiileyaasha guryaha/amaahiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay raadsadaan la-talin dhinaca sharciga ku saabsan wixii su'aalo ah ee ay ka qabaan xaaladaha iyaga u gaarka ah.
- **Maxaa dhacaya haddii mulkiiluhu/amaahiyuhu ku xadgudbo hakintan?**
 - Qofka si kas ah ugu xadgudba hakinta ayaa waxaa lagu qaadayaa dembiga misdemeanor oo markii lagu helo waxaa lagu ciqaabi karaa ganaax aan ka badnayn \$1,000 ama xabsi aan ka badnayn 90 maalmood. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu sidoo kale hirgalin karaa amarka iyadoo la adeegsanayo mid uun ka ah qodobada ku jira Xeerka Minn. Stat. 8.31.
- **LA CUSBOONAYSIIYAY 2.19.2021 Amarka joojinta federaalka ee ka saarista guryuhu miyuu ka dhiganyahay in amarka fulinta ee Minnesota uusan hadda ansax ahayn?**
 - Maya Amarka joojinta ka saarista ee federaalku guud ahaan ma khuseeyo gobolada leh amarka joojinta ka saarida oo bixiya heer difaacitaan la mid ah ama ka sarreeya oo ah ilaalinta caafimaadka bulshada.
- **LA CUSBOONAYSIIYAY 2.19.2021 Maxaa dhacaya haddii Guddoomiye Walz uusan kordhinin muddada amarka xaaladaha degdeg ah ee dadweynaha? Amarka joojinta ee federaalka miyaa lagu dabakhi doonaa?**

- Amarka joojinta ka saarida guryaha ee gobolka ee ku jira Amarka Fulinta 20-79 ayaa shaqaynaya ilaa iyo inta xaalada deg-degga ah ee gobolka lagu jiro. Haddii aan muddada la kordhin, amarka joojintu wuu dhammaanayaa. Haddii ay taasi dhacdo, amarka joojinta ka saarista guryaha ee federaalka ayaa la adeegsan doonaa illaa uu ka dhacayo. Amarka joojinta ee federaalka ayaa wuxuu ku egtahay 31-Maarso, 2021.

- **Milkiileyaasha guryaha:**

- **Miyaan guri ka saarida ka xareyn karaa maxkamada ama miyaan ku dhaqaaqi karaa jebinta heshiiska kirada inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha?**
 - Maya. Amarkani wuxuu si kumeelgaar ah u joojinayaa awooda xaraynta ka saarida guriga ama jebinta heshiiska ijaarka inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka.
- **Haddii ka saarida ama joojinta heshiiska ijaarka la ogolaaday ka hor Maarso 1, 2020, oo gofka degani ku sii noolyahay goobta dhismaha, miyaa looga baahan yahay inay guuraan?**
 - Maya. Amarkani wuxuu si kumeelgaar ah u joojinayaa awooda mulkiilaha gurigu in uu soo ceshado dhismaha, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka.
- **Ka waran haddii kiraystuhu uu bixin kari waayo kirada ama uu la dibdhaco bixinta kirada?**
 - Haddii kiraystuhu uusan awoodin inuu bixiyo kirada, mulkiilaha iyo kiraystaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay raadiyaan lacagaha gargaarka deg-dega ah ee deegaanka iyo inay ka wada shaqeeyaan qorshaha bixinta lacagta oo macquul ah. Marka ay dhamaato hakintu, mulkiiluhu wuxuu raadsan karaa dhamaan wixii magdhow ah ee sharcigu ogolyahay
- **Mulkiileyaashu miyay sii wadi karaan aruurinta lacagaha kirada?**
 - Hakintan kuma jiraan wax ka dhaafaya kiraystuhu inuu bixiyo kirada ama wax xaddidaya awooda mulkiilaha in uu helo kirada u waajibtay. Milkiileyaasha guryaha leh ayaa badanaa waxay ku tiirsan yihiin lacagta wakhtigeeda lagu bixiyo si ay u daboolaan kharashyada guryaha, bixinta deynta, adeegyada qaarkood, iyo adeega deynta. Soo aruurinta kirada, dhimista, ama ka dhaafitaanku waa go'aan u yaalla mulkiilaha.
- **Haddii heshiiska kiradu dhammaado oo deganuhu uu rabo inuu ka guuro wixii ka dambeeya Maarso 1, 2020, miyaa looga baahan yahay inay joogaan?**
 - Maya. Dadka degan guriga ayaa waxay si iskood ah u ogolaan karaan inay banneeyaan guriga.
- **Haddii heshiiska kiraystahaygu uu dhamaanayo inta lagu jiro hakinta, miyaan ka dalban karaa inay guuraan?**
 - Maya. Guri bixiyuhu ma fulin karo in jebinta heshiiska ijaarka isaga oo u maraya in uu bixiyo ogaysiis in guriga laga baxo, ama ficil guri ka saaritaan ah (marka laga reebo sida ku cad amarka) inta lagu jiro muddada hakinta.
- **Haddii aan haysto tallaabo guriga ka saaritaan oo maxkamad sugaysa, miyaan u baahanahay inaan dib u soo bilaabo hawshaas mise si toos ah ayay u sii socon doontaa kadib marka ay hakintu dhammaato?**
 - Maamulaha maxkamadda ayaa leh awooda go'aaminta sida wax looga qabanayo kiisaska guri ka saaritaanka ee socda. Laakiin amarku wuxuu joojinayaa fulinta soo ceshashada guryaha, markaa haddii reerka laga saaro guriga inta lagu jiro xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadweynaha, qasab lagagama saari karo guriga.

- **(LAGU DARAY 9.17.2020) Amarka Fulinta ee 20-79 wuxuu leeyahay waa inaan siiyo ogaysiis goraal ah oo oo ku saabsan in ujeedadu tahay inaad xaraynayso tallaabada guri ka saaris ah ugu yaraan toddoba maalmood ka hor ama muddada ogaysiiska ee la cayimay eek u jirta heshiiska kirada hadba middii dheer, Tan macnaheedu ma waxa weeyaan inaan u hogaansamo mudada ogaysiiska ee in aan la cusboonaysiinaynin ama la joojinayo heshiiska kiraysashada?**
 - Maya. “Muddada ogeysiiska ee la cayimay” waxaa loola jeedaa xaaladaha halka heshiiska kirada uu leeyahay "ogaysiis lagu saxayo" ama "ogaysiiska ka saarista" (“notice to cure” or “eviction notice”). “Muddada ogeysiiska ee la cayimay” macnaheedu ma aha ogaysiiska joojinta heshiiska kiraynta, caadi ahaan waa 30 maalmood ama ka badan.
- **LA CUSBOONAYSIIYAY 2.19.2021 Haddii aan doonayo inaan u soo raro xubin ka mid ah qoyskayga ama aan anigu u soo guuro guriga, miyaan xarayn karaa tallaabo guri ka saaris ah si aan uga saaro kireystaha hadda ku jira?**
 - Haddii mulkiiluhu u baahdo inuu u soo guuro guriga ama in uu xubin qoyska ka mid ahi u soo guuro guri uu deggen yahay kirayste sida uu ogolyahay farqadda 3 ee Amarka Fulinta ee 20-79, mulkiiluhu waa inuu marka hore kireystaha siiyo ogeysiis sax ah oo ah jebinta heshiiska kirada ama ah in uusan dib u cusboonaysiinaynin heshiiska sida ku qoran heshiiska kirada ama sida sharcigu qabo. Haddii kiraystuhu uu diido inuu u hogaansamo jebinta/joojinta heshiiska kirada, kireeyuhu wuxuu qaadi karaa talaabooyin uu guriga kaga saarayo kiraystaha, laakiin aan ahayn ka hor intuuna bixin ogaysiiska 7 maalmooda ah ee in uu kireeyuhu damacsan yahay inuu guriga ka saaro.
- **LAGU DARAY 2.19.2021 Yaa loo tixgelinayaa inuu yahay "xubin qoyska ka mid ah"?**
 - Ujeeddooyinka Amarka Fulinta ee 20-79, xubin qoyska ka mid ah waa waalid, xaas, lammaane qoys ah, walaal, ilmo, sodog/sodoh ama qaraabo kale, sida lagu qeexay Xeerarka Minnesota ee 273.124 qayb hoosaadka 1 (c), ee milkiilaha guriga ama milkiilaha guriga xaaskiisa ama lammaane qoys ah.
- **LAGU DARAY 2.19.2021 Kireystaygii wuu iskaga baxay guriga isaga oo aan ii soo sheegin. Miyay tahay inaan xereeyo ficil guri ka saaritaan ah si aan dib ugula wareego?**
 - Guud ahaan, haddii ay caddahay in kirayste uu damacsanaa inuu iskaga tago guriga oo uu ka tanaasulo xuquuqdiisa haysasho, looma baahna in la xareeyo tallaabo guri ka saarid ah oo dib loogu soo ceshanayo lahaanshaha. Si kastaba ha noqotee, xitaa haddii kiraystuhu uu iskaga tago guriga, Xeerarka Minnesota 504b.271 ayaa waxay uga baahanyihiin milkiileyaasha inay raacaan tillaabooyinka qaarkood ee ku saabsan maaraynta hantida lagaga tagay dhismaha.
- **Kiraystayaasha:**
 - **Maxaa dhacaya haddii mulkiiluhu ku dhaqaaqo guri ka saarid?**
 - Mulkiiluhu ma bixin karo ogeysiinta ka saarida ama ma xarayn karo ficil sharci darro oo la wareegitaan ah inta uu amarkan fulin deg deg ah jiro, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka. Hoos ka fiiri khayraadka haddii mulkiilahaagu uu maxkamada ka xareeyo ka saaritaan inta lagu jiro muddada hakinta.
 - **Miyay qasab igu tahay inaan u hogaansamo heshiiska kiraysashada?**
 - Haa. Amarkan ma beddelayo qodobada iyo shuruudaha heshiiska kirada.

- **Sarkaal sharci fulin ayaa iga codsanaya inaan ka baxo iyada oo lagu salaynayo ka saaritaan ama jebinta heshiiska kirada oo mar hore la ogolaaday. Miyaa la iiga baahan yahay inaan guuro?**
 - Amarka Fulintu wuxuu farayaa saraakiisha haysa amarka did u soo ceshashada in ay joojiyaan fulinta, marka laga reebo halka loo ogolyahay hakinta.
- **Ma awoodo inaan bixiyo qayb ama dhammaan kiradayda. Maxaan u baahan nahay inaan sameeyo?**
 - Howsha guri ka saaritaanka iyo joojinta heshiiska kiraysashada ayaa si ku meelgaar ah loo hakiyey sida ku jirta amarka; laakiin, ijaarka lama dhimayo ama lama dhaafayo. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad kala shaqeyso mulkiilahaaga qorshaha dib u bixinta. Haddii aad weyday shaqadaadii, fadlan booqo websaytka Caymiska Shaqo la'aanta ee Minnesota si aad u ogaato inaad u qalanto caawimaada: www.uimn.org. Waxaad xaq u yeelan kartaa kaalmada degdega ah ee degmada. Si loo go'aamiyo inaad u qalanto kaalmada kirada, fadlan la xiriir mid ka mid ah khayraadka hoos ku taxan.
- **Amaahiyayaasha:**
 - **Miyaan guri ka saarida ka xareyn karaa maxkamada inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha?**
 - Maya. Amarkani wuxuu si kumeelgaar ah u joojinayaa awooda xaraynta ka saarida guriga inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka. Hakintan kuma jiraan wax ka dhaafaya mulkiilaha guriga inuu bixiyo waajibaadka wixii lacag ah ee laga rabo ama wax xaddidaya awooda deyn bixiyaha in uu helo lacagta u waajibtay. Amarkan wuxuu deyn bixiyayaasha ka codsanayaa inaysan ku soo rogin khidmada la daahitaanta iyo ganaaxyada.
 - **Haddii ka saarida guriga la ogolaaday ka hor Maarso 1, 2020, oo qofka degani ku sii noolyahay goobta dhismaha, miyaa looga baahan yahay inay guuraan?**
 - Maya. Amarkani wuxuu si kumeelgaar ah u joojinayaa awooda amaahiyuhu in uu soo ceshado dhismaha, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka.
 - **Milkiilaha guriga ma u diri karaa ogeysiiska guri la wareegista bangiga?**
 - Haa. Amarkan Fulinta wuxuu ku dhiirigelinayaa amaah-bixiyayaasha inay joojiyaan dacwada guri la wareegida, laakiin loogama baahna. Deyn bixiyayaashu ma xarayn karaa ka saaritaanka kadib marka bangigu la wareego ama ma bixin karaan ogeysiiska inay banneeyaan dhismaha ka dib marka ay dhamaato Muddada lasoo noqoshadu marka lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha.
 - **Maxaa dhacaya haddii amaahiyuhu ku dhaqaaqo guri ka saarid?**
 - Amaah bixiyuhu ma bixin karo ogeysiiska ka saarida ama ma xarayn karo ficil sharci darro oo la wareegitaan ah inta uu amarkan fulinta deg deg ah jiro, marka laga reebo meelaha laga reebay amarka
- **Mulkiileyaasha guryaha:**
 - **Guri ka saarid ayaa la xareeyay ama la ogolaaday kahor Maarso 1, 2020. Miyaa la iiga baahan yahay inaan guuro?**
 - Maya. Amarkani wuxuu si kumeelgaar ah u joojinayaa awooda xaraynta ka saarida guriga inta lagu jiro xaalada degdega ah ee caafimaadka dadweynaha, marka laga reebo duruufo xaddidan sida ku qeexan amarka. Hakintan kuma jiraan wax ka

- dhaafaya mulkiilaha guriga inuu bixiyo waajibaadka wixii lacag ah ee laga rabo ama wax xaddidaya awooda deyn bixiyaha in uu helo lacagta u waajibtay.
- **Ka waran haddii mulkiilaha gurigu uu bixin kari waayo bixinta amaahda guryaha?**
 - Mulkiilaha guriga waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu la xiriiro adeeg bixiyaha amaahda guryaha si uu ugala hadlo fursadaha jira ee la heli karo.
 - **Ka waran haddii aan helo ogeysiis ku saabsan guri la wareegis bangi?**
 - Amarka Fulinta wuxuu ka codsanayaa hay'adaha maaliyadu in ay fuliyaan joojinta guri la wareegista, laakiin ma joojinayo dacwooyinka guri la wareegista. Mulkiileyaasha guryuhu waa inay la xiriiraan adeeg bixiyaha amaahda gurigooda si ay ugala hadlaan fursadaha kale ee dib u bixinta haddii ay jeclaan lahaayeen inay sii joogaan gurigooda muddada dheer.
 - **Maxaa dhacaya haddii amaahiyuhu ku dhaqaaqo guri ka saarid?**
 - Amaah bixiyuhu ma bixin karo ogeysiiska ka saarida ama ma xarayn karo ficil sharci darro oo la wareegitaan ah inta uu amarkan fulinta deg deg ah jiro, marka laga reebo meelaha laga reebay amarka
 - **Sarkaal sharci fulin ayaa iga codsanaya inaan ka baxo iyada oo lagu salaynayo ka saaritaan ama jebinta heshiiska kirada oo mar hore la ogolaaday. Miyaa la iiga baahan yahay inaan guuro?**
 - Dhamaan saraakiisha gacanta ku haya amar ka saaritaanku waa inay joojiyaan fulinta amarka dib u soo ceshashada, marka laga reebo halka loo ogolyahay hakinta.
- **Khayraadka iyo Macluumaadka lala Xiriirka:**
 - **Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud**
Websaytka: <https://www.ag.state.mn.us/Office/ContactUs.asp>
Wac: (651) 296-3353 (Soo Wicitaanka Agagaarka Magaalooyinka Mataanaha ah)
(800) 657-3787 (Dibedda Magaalooyinka Mataanaha ah)
(800) 627-3529 (Laliska Minnesota Relay)
Codsiga khadka Internetka ah:
<https://www.ag.state.mn.us/Office/Forms/ConsumerAssistanceRequest.asp>
* Adeegyo turjubaan bilaash ah ayaa la bixiyaa markii la codsado
 - **United Way 211:** Macluumaadka bilaash ah oo qarsoodi ah oo caafimaadka iyo macluumaadka adeegyada aadanaha ah oo loogu talagalay dadka ku nool Minnesota.
Websaytka: www.211unitedway.org
Wac: 211 ama (651) 291-0211
Khadka Bilaashka ah: (800) 543-7709
Fariinta qoraalka taleefanka:
Fariinta qoraalka taleefanka ugu soo dir lambarkaaga ZIP code 898211 si aad u hesho macluumaad
Fariin Qoraal oo ah MNCovid u soo dir 898211 si aad u hesho Khayraadka COVID
* Caawinaad luqadeed ayaa lagu heli karaa Español (Isbaanish) iyo Hmoong
 - **Khadka HOME Line:** Caawimaad Sharci oo Bilaash ah oo loogu talagalay Kiraystayaasha Minnesota
Wac Khadka Tooska ah: (612) 728-5767
Khadka Bilaashk: (866) 866-3546

- HOME Line ofrece servicios en español. Para Español, llame al 612-255-8870.
- HOME Line waxay bixisaa adeeg ku baxa Afka-Soomaaliga. Af- Soomaali wac 612-255-8860.
- Peb lub koom haum HOME Line muaj neeg txhais lus Hmoob. Hais lus Hmoob, Hu 612-255-7104.

Email: www.homelinemn.org/e-mail-an-attorney

- **Minnesota Multihousing Association:** Waxay taageertaa xubnaha guryaha la wada dego iyo waxsaasaarka. Khadka tooska ah wuxuu bixiyaa macluumaad horay loo duubay oo ku saabsan mowduucyada milkiilaha/kiraystaha. Haddii aan su'aalahaaga lagaga jawaabin codka duuban, waxaad u dhaafi kartaa farriin iskii u tabarucaya ayaa kugu soo celin doona.
Wac Khadka tooska ah: (952) 858-8222, Garaac "0" si aad codka ugu duubto
Websaytka: www.mmha.com
- **Xarunta Gurilahaanshaha ee Minnesota:** Loogu talagalay lahaanshaha guryaha iyo macluumaad la xiriira kala-wareegista guri.
Soo wac: (651) 659-9336
Khadka Bilaashka: (866) 462-6466
Su'aalo ku waydiinta khadka internetka: <https://www.hocmn.org/contact-us/>
Websaytka: <https://www.hocmn.org>